

Laga bilaabo si dhakhso leh, ilaa iyo 12ka Juun, waalidiinta waxay ku soo gudbin karaan shaqada ardayda dhammaan goobaha iskuulada cuntada lagu qaybiyo ee Dugsiyada Dadweynaha Buffalo (BPS). Waxaa jiri doona weel lagu rido (bin) shaqooyinka ardada laga soo ururuyey goob kasta oo cunto qaybin ah, ayna weheliyaan baqshado waaweyn. Sababo amniga awgood, waalidiinta waxay u baahan doonaan **inay hore u soo qaataan qalin**. Baqshada korkeeda, waalidiinta/xannaaneeyayaasha waxay u baahan doonaan inay ku qoraan:

**Magaca Ardayga
Magaca Dugsiga
Magaca Macallinka iyo Fasalka (Grade)**

Kadib Shaqooyinka waa la kala saari doonaa waxaana la geyn doonaa dugsiga ku habboon ilaa **Maalinta Jimcaha, Juun 12-keeda, oo ah wakhtiga kama dambayska**. **FADLAN LA SOCO: Goobaha Shaqo Uruurinta waxa keliya khusaysa dadka ku soo gudbin kari waayey shaqada internetka. Qoysasku waxay wali awood u leeyihiin inay ku soo gudbiyaan shaqada khadka Onlayinka ilaa Juun 17-keeda. Haddii aad u soo dirtay shaqada macalimiinta si elektiroonig ahaan, uma baahnid inaad sidoo kale aad keento shaqadaas goobaha cuntada lagu qaybiyo.**